

# MA QABTAA COVID-19? MA U BAAHAN TAHAY TAAGEERO?



Miyaan u baahanahay  
baaritaanka COVID-19?

- Ma u **baylahday** COVID-19?
- Ma leedahay **astaamo**?
- Eeg tilmaamaha onlaynka ah ee Maine

**Xasuusnaw inaad is ilaalso!** Xiro afsaab, dadka ka fogow, oo dhaq gacmahaaga ama isticmaal gacmo-nadiifiye



**Isbaar!**

- Ha lagugu baaro meesha dadka lagu baaro ama cusbitaal
- Waxa waajib ah inaad isgo'doomiso ama iskarantiisho ilaa inta aad helayo natijjooyinkaaga
- Haddii aad u baahan tahay taageero si aad guriga u joogto, codso in laguu gudbiyo **Daryeelka Bulshada ee Adeegyada Taageerada Bulsheed**
- Goobta baaritaanka ayaa ku soo wici ama farriin kuu soo diri si ay natijjadaada kuugu sheegto



**Daryeelka  
Bulshada ee  
Adeegyada  
Taageerada  
Bulsheed**



**Ka waran  
haddii  
cudurka  
laga iga  
helo?**

- Maine CDC ayaa kula soo hadli kuna waydiin doonta:
  - **Halkee** caabugu kaa helay?
  - Ma leedahay **astaamo**?
  - Waa ayo cidda aad **isku dhawaateen**?
- Waxay wici doonaan ciddii aad isku dhawaateen si ay u ogaadaan haddii ay astaamo leeyihii una baahan yihiin karantiil ama go'doomin.
- Waxa waajib ah inaad isgo'doomiso, ayey Maine CDC kuu sheegi doontaa mudada ay noqonayso
- Waxay kaa caawin inaad hesho **Daryeelka Bulshada ee Adeegyada Taageerada Bulsheed**



Waxaad waydiin kartaa  
**hoggaamiyaha  
bulshadaada,  
dhakhtarka,  
bixiyaha daryeelka  
caafimaad,  
adeegaha  
bulsheed,  
kaalkaaliyaha  
caafimaadka  
dugsiga, AMA  
**Maine CDC**  
taageero inaad isgo'doomiso ama iskarantiisho.**

Tixraac adigoo adeegsanaya iimeyl  [@DHHS.covidsocialsupport@maine.gov](mailto:@DHHS.covidsocialsupport@maine.gov) ama  
adeegsanaya foomkan onlaynka ah



# ADEEGYADA TAAGEERADA DARYEELKA BULSHADA EE COVID-19



**Waa maxay  
Taageerooyinka  
Bulsheed ee  
Daryeelka  
Bulshada?**

Taageerooyinka Bulsheed ee Daryeelka Bulshada waa adeegyo ay cid kasta oo u baahan caawimo inay iskarantiisho ama isgo'doomiso ay heli karto. Adeegyada waxa bixiya ururrada bulshada deegaanka waxaana kamid ah:

- **Cuntada (bagaashka/cuntada karsan/cunto u gaynta)**
- **Adeegyada isku xirka dhaqamada iyo luuqadda**
- **Kahortagga iyo gudbinaha caafimaad**
- **Gaadiidka aadaya xarumaha baaritaanka, xarumaha daryeelka caafimaadka iyo gabbaadyada**
- **Qaadista saadka iyo daawooyinka**
- **Adeegyada caafimaadka dhimirka**
- **Guryeyn/gabbaad badbaado ah muddada lagu jiro go'doomin ama karantiil**
- **Ku xirmidda adeegyo taageero badan**



**Goorma ayaan  
heli karaa  
taageero?**

- Wxaad leedahay **astaamaha COVID-19 AMA**
- Wxaad **sugaysaa** natijjooyinkaaga baaritaanka **AMA**
- Wxa lagaa **helay COVID-19 AMA**
- Wxaad **u dhawaatay** qof qaba caabuqa COVID-19



**Sidee ayaan u  
heli karaa  
adeegyadan?**

- **Hoggaamiyaha bulshadaada, dhakhtarka, bixiyaha daryeelka caafimaad, adeegaha bulsheed, kaalkaaliyaha caafimaadka dugsiga, AMA Maine CDC** waxay kuu gudbin karaan taageero inaad hesho
- Marka aad oggolaato, waxay ku samayn karaan gudbinta iimeyl ay u diraan **DHHS.covidsocialsupports@maine.gov ama** buuxinta **foomkan onlaynka ah`**

Tixraac adigoo adeegsanaya iimeyl [DHHS.covidsocialsupport@maine.gov](mailto:DHHS.covidsocialsupport@maine.gov) ama adeegsanaya foomkan onlaynka ah

